

dastuurka leesu ururiyay

Guddiga arrimaha bulshada

Saami qaadidda marka la baarayo
aabbanimada
SOSFS 2013:20 (M)
Xeerar

Dastuurka leesu ururiyay ee Guddiga arrimaha bulshada (SOSFS) ayaa lagu faafinayaa xeerarka hey'adda iyo talooyin guud.

- Xeerarku waa sharchiyo aan laga bixi karin.
- Talooyinka guud waxay ka koobanyihii talooyin ku aaddan sida xeer loo dabbaqi karo ama ay habboontahay in loo dabbaqo, meeshana kama saarayaan sida loo gaarayo hadafyada looga gol leeyahay dastuurka.

Guddiga arrimaha bulshadu wuxuu sanad walba soo saaraa tusmo ku aaddan xeerarka shaqeynaya iyo talooyin guud.

SOSFS waxaa laga soo degsan karaa ama laga dalban karaa:

www.socialstyrelsen.se/publikationer
e-mail: publikationsservice@socialstyrelsen.se
fax: 035-19 75 29

ISSN 0346-6000 Maqaal nr 2013-5-44

Daabacaad: Edita Västra Aros, Västerås 2013

Dastuurka leesu ururiyay ee Guddiga arrimaha bulshada

Soo saaraha mas'uulka ah: Gar yaqaanka madaxda ah Eleonore Källstrand Nord

**Xeerarka xarunta caafimaadka caddaaladda la xiriira ee ku aaddan
saami qaadidda marka baaritaan aabbanimo la sameynayo;**

waxaa la go'aamiyay maalintii 13 mey 2013.

Xarunta caafimaadka la xiriira caddaaladdu waxay go'aamineysaa waxa soo socda iyadoo kaashaneysa qodobka 6 ee xeerka (1969:624) ee ku aaddan baaritaanka dhiigga iwm. marka la sameynayo baaritaan aabbanimo.

Aagagga dabbaqaadda

1 § Xeerarkaasi waxay shaqeynayaan marka saami la qaadayo, ka hor baaritaannada nuucaas ah ee loogu tala galay sharciga (1958:642) ee ku aaddan dhiig baarista iwm. marka la sameynayo baaritaan aabbanimo.

Caddeyn saami qaadid

2 § Qofka saami qaadidda mas'uulka ka ah waa in uu saami qaadidda ka hor qofka saamiga laga qaadayo (saami bixiyaha) u soo saaraa caddeyn saami qaadid. Caddeyn ta waxaa lagu soo saarayaa foomka "Provtagningsintyg" (*lifaaqa*).

Koontarooliid ku aaddan aqoonsiga saami bixiyaha

3 § Inta aan saami la qaadin waa in qofka saamiga qaadaya (saami qaaduhu) hubiyaa aqoonsiga saami bixiyaha. Caddeyn ta saami qaadaha waa in lagu sheegaa sida aqoonsiga loo xaqiijiyay.

Saami bixiyuhu waa in uu inta aan saamiga laga qaadin xaqiijiyaa aqoonsigiisa isagoo caddeyn ta saxiixaya. Haddii aqoonsiga saami bixiyaha ay cid kale hubisay, xitaa qofkaasi waa in uu caddeyn ta magaciisa ku saxiixaa.

Haddii uusan saami bixiyuhu buuxin 18 sano, waa in waalidka ama haddii kale qofka xaqiijiyay aqoonsiga saami bixiyaha uu caddeyn ta saxiixo.

Calaameyn ta saamiga, iwm.

4 § Inta aan saami la qaadin waa in cidda saamiga qaadeysa ay qalabka ay saamiga ku qaadeysa ku calaameysa magaca iyo tobanka nambar ama nambarrada aqoonsiga ee ku meel gaarka ah ee saami bixiyaha.

5 § Marka la qaadayo saamiga dhiigga waa in la isticmaalaa tubbada saami qaadidda ee EDTA. Tubbada saami qaadidda waxaa la rogrogayaa dhawr jeer ka dib marka saamiga la qaado.

SOSFS 2013:20 (M)

Waxay daabacaadda ka soo baxay 4 juun 2013

SOSFS

2013:20 Maareynta saamiga

6 § Saamiga iyo caddeyn ta saami qaadista waxaa iyagoo isku meel ku jira loo dirayaa Rättsmedicinalverket, Avdelningen för rättsgenetik och rättskemi i Linköping.

1. Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa 1 Agoosto 2013.
2. Iyadoo la marayo dastuurka ayaa la joojinayaa xeerkanka iyo talooyinka guud ee Xarunta caafimaadka la xiriira caddaaladda (SOSFS 2002:3) ee ku aaddan saami qaadidda marka aabbanimo la baarayo.

Xarunta caafimaadka ee la xiriirta caddaaladda

ERNA ZELMIN-EKENHEM

Manolis Nymark

Lifaaq

SOSFS 2013:20

[Qoraal qor]

CADDEYN SAAMI QAADID

Macluumaadka ku jira shahaaddadan waxaa
maareyneysa Xarunta caddaaladda la xiriirta
caafimaadka iyadoo kaashaneysa xeerka
macluumaadka shahsiga ah (1998:204).

Shahaaddada iyo saamiga u dir

Rättsmedicinalverket
Avdelningen för rättsgenetik och rättskemi Box 1383
581 13 LINKÖPING

Dalbade

.....
.....

Saami bixiye

Magaca hore	Magaca dambe	Tobanka nambar/nambarrada aqoonsiga ee ku meel gaarka ah
Ka soo jeeda waddan ka baxsan Yurub <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya	Taariikhda saami qaadidha <input type="checkbox"/> haweeneyda	Saami bixiyuhu waa <input type="checkbox"/> canugga <input type="checkbox"/> ninka <input type="checkbox"/> qof kale

Aqoonsiga saami bixiyaha waxaa laga xaqijiijay

<input type="checkbox"/> dukumiinti aqoonsi, macnaha
<input type="checkbox"/> in saami qaaduhu uu yaqaan saami bixiyaha
<input type="checkbox"/> qof kale oo leh dukumiinti aqoonsi, macnaha

Nuuc saamiga

<input type="checkbox"/> Saamiga dheecaanka ee kaarka FTA (eeg tilmaamooyinka ku jira bacda waxyabaha wax lagu baaro)
<input type="checkbox"/> Saami dhiig, tubbada saamiga EDTA 1-3 ml
<input type="checkbox"/> Nuuc kale oo saami ah

Macluumaadka kale

<input type="checkbox"/> Saamiga dheecaanka ee kaarka FTA (eeg tilmaamooyinka ku jira bacda waxyabaha wax lagu baaro)
<input type="checkbox"/> Saami dhiig, tubbada saamiga EDTA 1-3 ml
<input type="checkbox"/> Nuuc kale oo saami ah

Saami bixiyuhu wuxuu maray dhuux ku tallaalid <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
--

Saxiixyo

Saxixa saami bixiyaha/waalidka/cid kale	Saxixa iyo derejada saami qaadaha
Magaca oo seddaxan	Magaca oo seddaxan
Meesha saamiga lagu qaaday, ciinwaan iyo nambar taleefan	